

# Xukunka Fasaad/Fitna book ama Facebook?

## Su'aal:

Waxa jira website la yiraahdo **Facebook** [Feys-buuk] oo aad u shaac baxay oo adduunka oo dhan ku faafay. Qofkasta websitakaan ku jira bog buu ku leeyahay gooni u ah ee uu wax ku qorto oo uu sawiro gashto. Websitakaan Ragga wuxuu suurtagaliyey in dumarka masawiradooda fiirsadaan, dumarkana sidoo kale waxaana dhacda in ay kulmaan (marka ay facebook iska bartaan). Joornaalo iyo akhbaarta qaarkood waxay soo weriyeen in websitaka ay ka rakibantay dad la afduubay iyo zino. Ahlu Sunnada qaarkood baa websitaka Dacwa ay ku faafinayaan daraadeed u galay. Anagoo waxaan soo sheegnay oo dhan og, ma arrin inoo banaan baa in aanu ka qeyb galno?

## Jawaab:

**Sheekh al-Callaamah Rabiic ibn Haadi al-Madkhali:** " Qofka Salafiga ah websaytyaashaas oo kale ma aado, websaytyaal oo Salafi ah way buuxaan oo u qofka aadi karo.

**Sheekh Abu Cumar Usaamah Cutaybi:** Facebook wuxuu ka tirsan yahay websaytyaasha khariban oo fasahaadsan. Waxana la yiri in ay Yuhuud ka dambeyso. Allaah baa taas xaqiiqadeeda og. Si kasta ha ahaatee, taas mid ina khuseysa ma ahan. Waxaa ina khuseeya waxa weeye in aanu ogaano in waxa ka dhaca websaytkaas in ay yihiin wax Shareecada ay banaysay iyo in kale. In ay ragga iyo dumarka wada sheekeystaan oo kulmaan iyo waxyaalaha kale ee musuq-maasuqnimada ah ee lagu dhex wado, waa wax xaaram ah. Dumarkuna waa daciif, marka barnaamijyadaan ee ah Messenger (MSN) iyo Chat iyo kuwa la mid ah ee ay dumarka iyo ragga ku wada xiriiran, waa wax bulshada dhaawacaya. Maadaama ay dumarku yihiin daciif, waa wax sinaba loo ogoleyn oo xaaram ah. Intee baa zino, furitaan iyo dambi ka rakibmay isticmaalka barnaamijyadaan? Waxaasna waa wax la wada ogyahay. Facebook wuxuu isu keenay sharka barnamijyadaan oo dhan wuuna sii kordhiyey oo aad buu ugu dheereeya (arrimahaan sharka ah). Marka waa websayt fisqi iyo musuq-maasuqnimo miiran. Hadii aad bog Dacwada ku saabsan furatid, waxa dhacaysa in ay dumarku soo galaan. Taasna waxay keensanaysaa in lala hadlo oo la dhexgalo, waxana laga yaaba in ay masawirkeeda kuu soo dirto, arrimahaana waa wax aan Facebook dhexdiisa laga fursan karin. Saas daraadeed in la isticmaalo **websaytkaas waa mamnuuc**, waxaana kula talin lahaa dhalinyarta in ay **ka fogaadaan dadkana ay ka waaniyaan**. In ay dad gaalo ah iyo Muslimiin macasi ku jira in ay isticmaalaan

websaytkaas, inooma noqonayso sabab aanu ku galno (oo aanu dhahno dacwo baanu ku fidineyna). **Marka waxaan idinku talinlaheyn inaad galin.**

**Sheekh Abu Camr al-Xajuri** [ Dammaaj ]: Rabbigeen Tacaala wuxuu ku leeyahay Kitaabkiisa Sharafta miiran: وَالَّذِينَ لَا وَالَّذِينَ لَا وَالَّذِينَ لَا "Kuwa ka markhaati kicin beenta, hadii ay soo maraan al-Laghw (wixii hadal xun oo dhan), sharaf uga gudba." Micnayaasha يَشْهَدُونَ (markhaati kicin) waxa ka mid ah ضُرُون (qofka inuu goob joog ahaado). Marka Muslimka Allaah ka baqaya looma ogola inuu websaytkaas isticmaalo ama ka qeybgalo. Taasna waxa keenay fasaadka iyo sharka baahsan, sida masawirada iyo dumarka lala kulmo, iyo waxyaalaha ka rakibma websaytkaas, sida zinada iyo afduubka iyo wixii dambi ah ee ka hara. Allaah fadligiisa iyo nicmadiisa bay ku suurtagashay in uu qofkii raba bog ama forum sameysankaro. Marka Ahlu Sunnada websaytkaal iyo forum u khaas ah ha sameysteen oo dunuubta iyo macasida laysagu caawineynin ee, kheyarka la isku caawiyo iyo dadka Allaah loogu yeero. Websaytkaashaan (sida Facebook, Myspace, iwm) in uu qofka ka qeybgalo, hadii xitaa uu u arko in kheyrr ku jiro, sharka ku jira baa ka badan marka qofka inuu ka qeybgalo waxay la mid tahay sharka ee la waafaqo, marka lama ogola in laga qeybgalo.

waxa laga soo turjumay: [dtssbc.multiply.com/journal/item/196/ Th... OR Any Other Reason](http://dtssbc.multiply.com/journal/item/196/Th...OR_Any_Other_Reason)

**Halkaan Ka Dhagayso**

**Waxaa Diyaarisay: Umm Maryam AsSwidiyya**

اللهم أرنا الحق حقا وارزقنا إياه، وأرنا الباطل باطلا وارزقنا إبعاده  
أمن